waxaan Weeydiiyey Odoy Geed Hoostiiis fadhiya waa maxay Ula jeedada Halaheyskaas Wxuu Igu Jawaabay Dabacadooow Hunguriga Lagama Taliyo Oo sida Uu doonayo Looma Yeelo Caloosha adooon Looma noqdo .

2:hadal Waa Run kama rays.

Isla ninkii ayaan weydiiyey Tanna wuxuuna I Yiri Dabacadooow U jeedka halaheyskaas waa Hadal Run Ka raaac.

3: Qunyar Socde Qodaxi ma muddo.

Isla Ninkii Ayaan Hadana Tanna iga Jawaabay Hadda Ogoow Ninkaasi Haduu Ka dhalan Lahaaa Dad aaan Ahayn Somalida wuxuu ahaan Lahaa Philosophy Dunnida oo dhan ay Usoo doonanto xigmada Iyo waayoaragniamda lakiin Naziiib Xummo somali ayuu ku dhashay

Wuxuu ku jawaabay Wax Yar Miyirka u adeegso.

Annoo sii socda Oo ay Iga dhamaadeyn Halaheyayadii ayuu Ii Yeeray Oo iyiri Dabacadooow Mid baan Kugu Dari

Nin Maalin Ma Gaadhid -Nin Kaa Faras fiican

Ninna Sannad Ma Gaadhid -Ninka kaa Gaadiiid Fiican

Ninna Waligaa ma gaadhid -nin Kaa oori Fiican .

Markaan intaas Maqlay ayaan Go,aan Ku Gaaray Inaan Gabar ka guursado Dadka saaas U xigmada badan Waana Ka guursadey Oo Ilaa hda Weynu wadda Joognaa .

Mid Kale Soomalida waa dadkan Dunnida ugu hantida ,Dunnida Waxa Ugu Xun Waxa Weeye Waa Taariikhdaada hala Inkiro Oo Halagaa dhaco Ninka ay dunnida ka aaminsan Tahay Inuu Yahya mid ka mid ah geesiyaasha dhaqanka

Ee Robin Hood Waxaa sheegtay Inuu Yahy English Lakiin Xaqiiiqda dhabta ah Waa Nin Soomaali ah Waana ninkii Wadada Silk Road Wadaaas Waxaa Mari Jirey Dadka Taajiriinta ah ,Markii Ninkiii La Dhihi jirey Nottinghamshire Ee somalida Ku Tilmaamay In Ay Yihiin Dadka dunnida Ugu geesi San Sababtoo ah Wuxuu Arkay Robin Hood Oo Wadaadaas Ka Celiyey Ninkaas ka dib lacagtaaas Uu ka qaaday Siin jirey dadkii ku noolaaa Ogaadeeniya ee dhacdo Itoobiya lakiin Taariikhdaaas waa La been Abuurtay Waxaana Laga Sameeyo sheeko kale Iyo Magacyo Kale Ninkaas ay U bixiyeeeen Robin Hood Magaciiisa saxda ah Waa Somalida Waxey Ugu yeeri Jireeyn Geedi Alle Ha u Naxariisteeh.

Sidoo Kale Waxaa Jiry Saddex nin Saddexdii Wax-garadka ahaa Waxa La kale Dhihi Jirey Baaslaawe ,Agas,Alaale Saddexdaas Nin Waxa Ay Ahayeen Saddex Nin Oo aad U Wax Garax Ah Xigmad Badan Noolaa Xilligiii Jan 1, 501 AD – Dec 31, 600 AD .

Waxaa La dhihi Jirey Saddexdii Isku qoyska Ahaa Saddexdaas Waxeey kasoo Jeedeyn middle east Waxaana Lugu Xusay Kitaabka Ay Kiristanku U aaminsan Yihiin Quduuska Ee Bible ka Buuga the Gospel Of Methew Wuxuu Saddexdaas Nin Ku Qeexay Waxeey ahayeeen Saddex Nin Kaas Oo Raacaaya xiddigta Bethlehem Si Ay U helaan badbaadiye badbaadiyahaas Oo Ay Sii Nayaaan fooxa iyo malmalka.

Wuxuuna ayadaas ay Raacisay In ay yihiin dad Xigmad Ah kaasoo Ay WaTaaan Alaabo qalaaad Taas waxeey ku Tusin In

Alaabtaas Aysan ka bixin Meeesha uu kasoo Jeedo buugaas Meesha Kaliya Ee laga Helo Foooxa Iyo Malmalka waa somalia xitaaa 1,500 BC Fircoonkii la oranjirey Seankhane Menthuhoteps IV ee Thebes ayaa sahan safar badeed usoodiray xeebaha Soomaaliya, kuwaas oo loo aqoonjirey dhulkii uduga "The Land of Punt."

Ilaa Hadda suaasha Jawaabteyda la la,yahay waa Halkee Beey Ku Taal Xidigta

Bethlehem.

Somalidu waxa Ay ahayeen dad Xidigaha Wax Ku Tirsada kuwaas Oo Raaca xidigaha somalida Waxa Ay U Qeybiyeen Cadceeda Afar daw kuwaas Oo ah Gu u ' ,Xagaa ,Jilaal , ama Diraaac .

Afartaas xilli waxa ay ku tirsan jireyn Afar qeybood Dayax Fadhi oo Midkiiba Yahay Toddobo dayax Fadhi.

A:Toddobo Dayax Fadhi Ee Xilliga Gu,Ga Waxaa la yiraahdaa Cirir Kuwaas Oo Ay Ku Xisaabsan Jireeyn Somalida.

Ì:Cirrir Furuuurane (labo Xiddigood)

Ii:jid Gabare (saddex Xiddigood)

Iii:Jid Gacanla (lix Xidiigood)

Iv:meecaad Guran (shan Xiddigood)

V:meecaad buuuxa (labo Xiddigood)

Vi :meecaad Hore (labbo Xiddigood)

Viii:Meecaad Dambe (labbo iyo Tobon Xiddigood)

B:Toddobada Dayax Fadhi Ee Xilliga xagaaga Wxaa la Yiraahdaa naafo Waxaa loo Tiriyaa Sida Kor Oo kale.

C:Toddobo Dayax Fadhi Ee Xiliiga dayrta waxa La yiraahdaa Dalaaaala

D:Todoobo Dayax fadhi Ee Xiliga jiilaaalka Waxa La Yiraahdaah Farac Waxa Loo Tiriyaah Waxaaas Oo Dhan sida Loo Xisaabinayo Gu,Ga oo kale.

Waa U jeedaah Somalidu ineey Ahaayeeen Dad Tirsada Xidigaha Sidoo Kalena Waxeey lahaayeeh Xilli U gaar ah hadda ka muslimiintu Waxeey Mari Soomaaha 1443 Tan Miiladiguna wuxuu Mari soomaaha 2022 Sidaas Oo kale Ayey U leeyihiin Somaliduna Dabka ay shidato Iyo Cadceeda u Tirsan Jirtey

Oo Ah cadceedu Waa 365 maalmood wuxuuna Ka Kooban Yahay 12 biloood Waliba 12 Kaas biloodba waxeey Ay U sameysteen Magacyo Gaar Ah Waxa ay Kale yihiiin.

"Ibliiis Halna Ma aha ,Lakiin Wixii Aan Hal Ahayn Ee Marinhabaaba Ayuu Hannahaybsan Ku Caraaabiyaa".

Dhulkana Bidixlaa ku nool

Waxaa jira beenawaas,

Ibleyskuna waa bakhayl

Bahdiisuna waa yiciis.

Balway ku hor qaadayaan

Bustay kugu laabayaan

Wedkay balag saarayaan,

Hadday buro kaa helaan

Waxay kugu badhi furaan

Dharaaraha baane jiro,

Gabay

"Aar soo dib jiray neef haduu daacuftii geliyo,

Uu kaga dig siiyoo ilkaha dhiigga kaga daadsho,

Dugaaggaas yaryari sow kan cuna duudka haray moodka".

BILOWGII HANTI-WADAAGA

Dagaalkii koobad iyo kii labaad ee dunidu kuhoobatay udhaceen siiba waxbadan ayaa caalamka iska badalay. Kooxda majaraha caalamka uhaysa ee saldhigodu yahay wadamada horumarka casrigaa gaadhay ayaa intaan labadan dagaal dhicin caalmka kuhaystay warshado, iyo qalab waxsoosar (Industrial Revolution 1760-1860) oo dunida inteedakale udhoofin jiray lakinse wakhtiyadii danbe dunida ku qabsaday falsafado. Horumarka casriga ah ee wadamada galbeedka xiga lagu hayey waxaa ku tartamayey laba dhinac oo kasoo kalajeeda waqooyiga yurubta fog, qabaa'il ahaan.

Tartanka udhaxeey qolooyinka saancada ubadan ayaa ahaa mid muruq iyo maskaba laysu maquuninayo oo laysu adeegsanayey hadba xeelada ugu casriyaysan ee midba midkakale ku dhaafayo. Horumarkasta waxaa wehelinayey oo barbarsocday fashil laysu maleegayo. Dagaaladii dunida ka dhacay oo sababteeda lahaayen labadan qolo ee dusheena isku haysta markii dagaalkii foolka foolkahi kasoo dhamaaday hadana bilaabay dagaalkale oo maanka iyo maskaxda layska weeraryo

caalamka intiisakale lagu gumaynayo laguna hantiyado dad iyo duunyaba.

Wixii danbeeyey WW2 waxaa bilaabmay in falsafad/idelojiyad laysku maquuniyo oo maanka dadka lajabsado quluubtooda shacabka lala wareego. Dunida horumar casriya iyo qori caaradii lagu haystay waxaa bedalay diblomaasiyad, xisbiyo iyo teknolojiyad inlaysu adeegsado oo cidii intaa lagawaayo tareenka ka hadhidoonto. Hadii dagaal iyo jajuub wax lagu waday iminka waxaa loo guuray dagaalka qabow. Labo falsafadood ama feker oo isdhalay ayaa u xilsaaran dagaalka cusub ee dunida in lagu hago. Waa hanti-goosad (dimoqraadiyad) iyo hanti-wadaaga (shuuciyad).

Siyaasadaha iyo afkaaraha laga dhaxlay dagaalkii labaad dhamaadkiisi waxaa kamid ah Idolojiyada Shuuciga (Communism). Taarikhda aan iskuulada lagu dhigin ee kaaga baan inaad jowi hoose kulasoo baxdid ayaa inoo sheegay in fekerka shuuciyada kudhisan laga aminay in Ruush dunida keenay ayaa tilmaamay inaan ruushka laga aqoon fekerkan lakinse cidkale usoowariday.

Shuuciyadan dunida wareerisay ee xataa Maxamed Siyaad Barre khadka cas dhinacakale ka marisay ilaa iminka dhibkii ay reebtay walijiraan oo xanaftii maankooda aqoonyahanka soomliga raadkeedi walijiro ayaa ah taarikh dadku isweydiin. Taarikhda rasmiga ah ee shuuciyada waxay ka bilaabmatay jeel kuyaal dalka Jabaan (concentration Camp). Askartii ka qaybgashay dagaalkii labaad ee dunida ee maan iyo maskaxba

waxyeelo soogaadhen cidwalbana lahaa ayaa lagusoo ururiyey xero ‘camp’ xidhan oo loogu talogalay in maanka iyo maskaxdooda lagu jabsado. Jeelka cidamada guulaystay gacanta kuhayeen ayaa ahaa koob lagu casriya wakhtigaa oo lagu tijaabinayo qaabka dadka maankooda iyo maskooda loo masaxo dabadeedna falsafad cusub loogu shubankaro. Kooxda mashruuca wadatay ayaa ubadnayd yahuud yurub, waxay ku guulaysteen inay askartaa tabaalaysan maskaxdooda iyo maankooda jabsadaan dad cusub oo afkaar khaasa aminsan lagasoo saaro. Waxay mashruuca ku bilaaben askar looma ooyan ah oo badankoodu yihiin shikhsiyaad maal, maan iyo maskaxdu u fiyoobin oo bilaarajo ah waana arinta keenaysa in sifudud ruuxdoda loo maquuniyo loogu in guulaysto jabsado maankooda dabadeedna hawlgalin loodiro.

Askarta maankooda lagusoo carbiyey jeelka Jabaan ee sida gaarka ah loo xushay ayaa gacanta laga geliyey kooxda mashruuca socodsiinta shuuciyada qaabilsanaa oo qaarkood kamid ahaayen curiyaasha manifeestadii shuuciyada ‘communist manifesto’ lagu amray inay la shaqeeyan.

Kacdoonkii lagu riday boqortooyadi Tzars (Jewish Bolshevik Revolution)

1917 ayaa niman uu hogaaminayo Karl Marx (wuxuu ku aasanyahay meel aan sida uga fogayn London) oo uu kujiro Stalin, Lennin iyo Troysky iyo saraakil kale; ciidanka lugta hogaabinayan askartii ahayd hadhaaga dagaalkii labaad (askartii jeelka jabaan) ee badankooda maan xanuun iyo tarooma kasoo

gaadhay WW2 unabaahnaa xanaano rasmiya ayaa loogaga faidaystay inay dal dhan afganbiyaan. Ragii looso xambaariyey fekerka shuuciyada lagana soo buuxiyey afkaarta falsafada dunida ku faafidoonta ee hanti-wadaaga ay suuqa iyo xaafada magaaloyinka waa weyn ee ruushka guriguri ugalayey ugdanbaystiina waxay ku guuleysteen inay afgambiyaan boqortooyadii ruushka waxayna laayen dhamaan qoyskii iyo qaraabadii boqorka. Waxay kaloo laayen wadaadadii diinta kiristanka majaraha u haysay iyo cid alaale cidii ay khatar u arkayeenba. 60 million oo qof baa gacantooda ku dhintay nimankaa ideolojiyada jeelka jabaan ku dhex alifay. Ragii awoowayasho iyo aboyaashod mashruuca jeelka jabaan lagusoo carbiyey waxaa kamid ah ninka iska leh shirkada “Som oil expl.” ee bada Soomaliya sahanka kawada.

Shuuciyada waxaa sameeyey koox hadaf fogleh oo doonaya inay caalamka wakhtikasta ka taliyaan oo taarikhkasta iyagu qoraan. Waa koox awod uleh wax alaale waxkasta oo maskax biniadam katimaada hirgalinkara. Waad dad aqoon, maal iyo awood siyaasadeed leh oo hindise miis dushiis lakeenay socodsiinkara. Fekerka shuuciyada iyo demoqradiyadaba waa laba falsafadood oo loogu talogalay hadba dhinac dunida loogu jeediyo dadkana layskaga mashquuliyo. Waa shimbir iyo labadeedi baalal, waa iskumid.

MAGACYADA MAALMAHA USBUUCA

Magacayada maalmaha dalalka reer galbeedka waxay ku salaysanyihiin meerayasha iyo magacyo ilaayo (asnaab) laga caabudijiray qarniyadii hore wadamada galbeedka xiga. Magacyada todobada maalmood ee usbuuca kujira waxay ku saleeyen waxyaabihii dhaqanka ay ulahaayen siiba diinta. Skandenayfiyanka, Greeka iyo Roomanka ayaa ka siman magacayada todobada maalmood looyaqaan, luuqada latiinka ayaa midaysa luuqadaha yurubta lagahadlo.

Waxaynu isdultaagaynaa taarikhda maalmaha iyo magacayda loobixyey meesha ay kasoo jeedan. Markasta oo aad tariikh akhrisid si'aynu dacdooyinka soomaray wax uga ogaano waxay kula gelay laba taarikhood oo dunida soomaray midkood, taarikhda qadiimiga ah ee fircooniyiinta "dhulka uduga" iyo tariikhda Mesabatoomiya "Ciraaq".

Xidigis yaqaanki Fircooniyiinta ayaa ku guuleystay inay ogaadan meereyaasha qoraxda ku dulwareega nooca ay yihiin, shaqada ay hayaan iyo diradooda. Meerayaasha dunida ka diwaangashani waa 7 meere ah. Todobadaa Meere waxay kala yihiin Dusaa (Mercury) oo Qorraxda ugu dhow, Waxaraxir (Venus), Dhulka (Earth) iyo meeraha Farraare (Mars). Meerayaasha waawayn ee hawada iyo boodhka ka samaysan waxay kalayihiin Cirjeex (Jupiter), Raage (Saturn), Uraano (Uranus) iyo meeraha Docay (Neptune).

Sidoo kale waxaa jira meerayaal yar-yar oo dhamaantood baraf, hawo iyo xoogaa caro ah ka sameysan waxaana ka mid ah meerayaasha yar ee Bluto (Pluto) oo waqtiyadii hore loo

aqoonsanaan jirey in uu ka mid yahay Bahda Midaysay Qorraxdu.

Wakhti farobadan ayey galiyeen xidigiyaashi hore ee reer Masar si'ay uga warkeenan xogta samada iyo xidigaha cirka ka muuqda. Waxay sameeyen daraasad dhaxalkiisu noqday cilmiga xidigiska "astronomy" iyo wakhtiga "Time". Xidigyankii reer Masar iftiinka qoroxda waxay ka dhigeen 12 saacadod habeenkiina 12.

Tadobada Meere 'The seven celestial bodies'

Xidigiyaashi hore sacad kasta waxay ku ladheen mere

Sacada 1aad: Raage (Saturn)

Sacada 2 aad: Cirjeex (Jupiter)

Sacada 3aad: Farraare (Mars)

Sacada 4aad: Sun Qoraxda

Sacada 5aad: Waxaraxir (Venus)

Sacada 6aad: Dusaa (Mercury)

Sacada 7aad: Moon Dayax

Sacada sideedad meeraha Raage "Saturn" bay kusoo noqonay sidaa sileeg saacada 15ka iyo saacada 22ba. Wareegaas bay raacayaan saacadahu kuligood.

Iyadoo laga duulayo nadaamka xidigiska bilowga ah ee fircooniyiintu (Soomalidu) alifeen waxay kaloo maalinta

usbuuca bilaabanta ugu magacdareen magacii ay wakhtiga/saacada ulabaxeen kuna salaysnaa meerayaasha.

Maalinta 1aad: Saturn

Maalinta 2aad: Sun

Maalinta 3aad: Moon

Maalinta 4aad: Mars

Maalinta 5aad: Mercury

Maalinta 6aad: Jupiter

Maalinta 7aad: Venus

Wadamada reer yurub oo wakhtigaa hore kala aqoon maalinta iyo habeen “Dark Ages” wakhti jaahili iskajiray ayaa markaliya kawarhelay cilmigan jiitay ee cilmi falaga. Xidigiska waxaa usoo waariday yahuuda oo iyagu cilmiga kalasoo qaxay fircooniyiinta, Iyo dhinaca giriiga oo midhadh bad-maaxi ulasoo tilaabay qaarada yurub. Waxay taarikh rasmiya ayaa tilmaamay in reer yurub dhaqanka, cilmiga iyo diintiiba kalayimaaden Afrika oo wakhtigaa iyagu caabudijirey meerayaasha iyo ilaayo aan jirin. Xadaarad kasta oo lagu faano waxay asalkeedu kulagalay Afrika siiba geeska afrika.

Fircooniyiinta, maalinta koobad ee usbuuca waxaa u ahayd sabtida (Soo-rogga) Saturn’s day ‘Saturday’, maalintaas ayaa lakala shaqo tegijiray. Halka reer bani Isreal maalinta ka dhigteen maalin nasasho, iyo in maalinta loo nisbeeyo maalintii ay kasoo baxsadeen boqorkii fircooniyiinta Ramses. Saturn’s day

(Saturday) waxay ubadaleen “Sabbath-day” oo ah maalin barooro diiq iyo badbaadi Ilaahay nabi Mose usoodiray.

Hadaynu raacno nadaamka lagasoo waariday fircooniyiinta ee meerayaasha ku fadhiya iyo dariiqada Yahuudu dunida ujeexday siiba dalalka reer galbeedka in sabtidu ‘Saturday’ usbuuca ugu danbayso maalinta Axaduna noqonay maalinta ugu horaysa ayaa sidan noqonaya.

Sunday: Maalinta qoroxda

Qoraxda ayaa laga caabudijiray dalalka barafku hadheeyey, waxay amineen hadii layska maslaxo oo laxuso inay usoobaxay qoraxdu (Dies solis – Helios, god of the sun). Ilaaha qoroxda waxay uyaqaanen Hiiliyos “Helios” waxaa astaan u ah Hiiliyos isla qoraxda. Astaanta qoraxada waxaad ku arkay meelo badan sida calammada dalalka dunida (Argentina, Japan, Namibia, USA iyo Uruguay). Aqoonyahanada cilmiga astaamaha “Symbolism” ayaa tilmaama in intabdan astaanta lagu dhex xardho calanka yihiin xusid dadban oo la xusayo ama laweynaynayo astaanta calanka ku dhexjirta noocay doonto hanoqotee.

Monday: Maalinta Dayaxa “Selene-day”

Maalinta Isniinta ‘Monday’ (Luna’ ama ‘Selene’) waa ilaahad, waana dayaxa waxanay caabudayaan (Dies lunae – Luna or Selene goddess of the moon) Dayaxa ayaa ah ilaaha habeenka madow iftiimiya iyo ilaaha haga mawjadaha bada.

Tuesday: Maalinta Farraare “Mars” ama “Tiir”

Maalinta ‘tiwesdaeg’ waxaa la xusaa ilaaha dagaalka (Dies martis – Mars or Aires (Tiir), god of war. Tiir (Tiw) wuxuu kunool yahay buur dushood waxaana loo yaqaanay inuu yahay ilaaha sita burjiga dagaalka iyo guulaha cidaamada. Waxaa la aaminsanaa hadii askari dagaal ku dhinto inuu soo degayo Tiir isagoo wata malaaigta dagaalka dabadeed maydka ayuu qaata maydka.

Wednesday: Maalinta ilaaha Woden

Maalinta arbacada (Wednesday, Wodnesdaeg – Woden’s day) waxay ugu magacdareen ilaaha guud ee Woden oo dhalay Tiir (Dies mercurii – Mercury). Wuxuu maamula cilmiga iyo xikmada dunida lagu hago. Waxay aminsanyihiin in in ilaah Woden aan waxba ka qarsoomin.

Thursday: Maalinta ilaaha ‘Thor’

Maalinta Khamiista Thor’s day (god of thunder) waxaa la xusaa ilaaha Thor danabka. Thor waxaa dhalay Woden wuxuuna ilaaliya boqortooyada aabihi, astaanta lagu yaqaan ‘Thor’ waa danabka oo uu ku dagaalamiyaqaan gacantana wuxuu markasta kusitaa dubbe.

Friday: Maalinta Fria’s- day

Maalinta Jimcaha (frigedaeg – Freya’s day (goddess of love) waxaa la xusaa ilaahada jacaylka “Fria” xidigeeduna yahay “Venus”. Friyya waxay ahayd islaan uu qabo Woden, waxayna dhashay ‘Thor’ iyo laba kale. Intaa diinta kiristanku soo gaadhin dalalka skandaneefiyanka waxaa laga caabudijiray sadex oo kala

ah Woden, Fria iyo Thor. Waa sadex ilaah oo isdhalay. Shaqada ayhayeen ayaa ahayd in dunidu ahaato nabad iyo inlagu wadajoog xasilooni.

Saturday: Maalinta meeraha Raage ‘Saturn’s day’

Maalinta sabtida (Seterne’s day (god of agriculture) waxaa la xusaa ilaaha “Saturn”, Saturn wuxuu qaabilsanaa hawada iyo wax soosarka. Hadii la xuso ‘Saturn’ waxaa barakooba delaga beeraha iyo xoolaha, lakinse hadii aanad waxba waydiin waxaa suurtogala inuu kuu cadhoodo ‘Saturn’ oo markaa dalag iyo xooloba meesha kuwaydid ayey ka aminsanyihiin khuraafadlayaasha hore. Qarnigii 17naad ayaa ladhaqan galiyey in magacayada meerayaasha iyo asnaabta loo adeegsado todobada maalmood ee usbuuca. Isticmaalka maalmaha sita magacyada ilaahyada kaladuwan ayaan ufiicnayn ruuxa muslimka ah, arinkaasuna wuxuu soo gelayaa shirk intuu doonoba haleekaade.

Qeeybtaaan waxeeynu Kaga Hadli SIYAASADA GEESKA AFRIKA & KHAYRAADKA KUJIRA.

Wali waa sidedi oo waxba iskamay badalin siyaasada ku wajahan wadamada Geeska Afrka, stratijada taal ee lagujoogo waa tii hore ee lagu isticmaarku dhigay ee lagu qaybsaday Afrika, kaliya waxaa isbadalay gumeystayaashi ku hirdamayey geeska Afrika ayaa jawi casriya amuuraha ubadalay. Tarikhda gumeysta iyo sifuhuu kusoo galay wadamada geeska afrika waxaa astaan u ah dagaalkii dhexmaray Itoobiya iyo Talyaaniga ee ka dhacay xuduuda Eritariya bilowgii qarnigii 18aad.

Dabayaaqadi 1880gii ayaa afrika loo tashaday. Wadamadii markaa horumarka gaadhay ee reer Yurub siiba kuwooda ugu cadcad wakhtigaa ayaa ogaansaday inay qaybsadaan qaarada afrika duunyo iyo dadba (1884 Berlin). Shirka Berlin ka dhacay ayaa noqday mid taarikhda baal madow kagala saancadaale ayaa afrika ku qaybsaday nin madax ahi kamuu maqnayn Ibliis’na dheho, waa laguwada socday in Afrika lagumeysto khayraadkana la bililiqaysto.

Shirkaa Berlin ka dhacay waxaa lagu gaadhay in wadankastaa soo xulo ragii kasoo talo bixin lahaa qaabka ugu macquulsan ee loo gumeysankaro dadka madmow, ragaa xeeldheerey ku ah sida qaarad iyo qoom loo gumeysto ayaa soo go’aamiyey in Afrika lagusii daayo rag xul ah oo tababaran oo isugujira wadaado, diblomasiyiin iyo saraakil cidaan kuwaaso shaqadoodu noqondoonto inay macluumad ka keenan wacyiga

dhabta ah ee kajira qaarada duulanka lagu yahay. Rag tababaran ee qaarada loo soodiray waxay soo sheegen inay suurtogal tahay in laqabsankaro dadka madmadow oo lagumaysan karo. Wadamada isku afkaar ahiba gaar ayey isu abaabulen si'ay dhulbaaxadleh markaliya ugu wadataliyaan. Qabsashada Afrika wey ku wadasocdeen lakinse marka arinku soogadho manfaca waxaad mooda in qabsanaani jirtay. Isticmaarku wuxuu kusoo horeeyey oo ku hor bilaabay qarjajacda wadamada xeebaha leh oo kadibna ugasii gudbeen wadamada badhtamaha Afrika.

Geeska Afrika, Talyaaniga iyo xulufadiisa waxay abaaren Eritriya oo waqooyi-bari kasoo galeen, koonfurta Somaliya "Italian Somaliland" xeebta dheer ee koonfur kutaal bay kasoo dageen. Ingiriis iyo xulufadiisa waxay kasoo degeen waqooyiga Soomaliya "British Somaliland" iyo xeebta Kenya. Jarmal wuxuu isku balaadhiyey wadamada Tanzania, Zinzibar iyo wadamada kale ee ku dhow. Fransiisku wuxuu kasoo dul degay ciisaha iyo canfarta. Ethiopia may lahayn xeeb ugaara oo waa loogu danbaysiiyey; waxaa muhiim ah inaynu aqoonsanaano in boqortoya Ethiopia markaa kajirtay ay saaxibo ku lahayd calaamka dawlado waaweyn oo mabaadiida kiristanka haysta tixgaliyana dalalka diinta kiristanka wadamada haysta.

Talyaaniga ayaa ugu cadcadaa wadamada damacu waday, wuxuuna danaynayey inuu kaligii ka taliyo Geeska Afrika waana takeenay in mabaadiida "Italian Manafesto" meelo badan baahiyo. Talyaanigu bilowgiiba wuxuu aqoonsaday in Ethiopia laf dhabar u tahay qacan ku haynta wadamada geeska. Ethiopia

ayaa noqotay dal dhul badan ka Talisa bulsho tiro badani ku nooshahay oo dal mustaqbal wax soosar leh laga helikaro dhaqaale badan ayuu daraasadka Talyaanigu sheegay. Qabsasho rasmiga oo Ethiopia lagu qabsanaayo ayaa Talyaanigu go'aamiyey, dagaalki ugu horeeyey ee dhexmara labada dal wuxuu ka dhacay dhul udhow xuduuda Ereitriya isla goobtaas oo dagaal qadhaadh ku dhexmaray cidamadii Talyaaniga iyo kuwii Ethiopia difaacayey. General Orasta Berlioni ayaa watay cidanka Talyaniga goobtaas ayaa lagu lajabiyey general Berlioni iyo cidaanku watayba. Soo rogaal celistii danbe ayuu Talyaanigu ku guuleystay inuu ka xoog roonado cidamada Ethioipia waxaan la qabsaday Adis Ababa oo Talyaanigu xukumayey 6 sano.

Qabsashadii afrika waxaa xigay Dagaalkii labaad ee dunida "WW2" oo salka ku haya kala riixsasho khayraad, in wadankale oo xor ah isticmaar lahoos geeyo leeyahay iyo hogaaminta siyaasada dunida cid qabanaysa. Ingiriis iyo xulufadii lasocotay ayaa marlabaad ka itaal roonaday xulufadii Talyaaniga.

Xulufadii shuuciyada "Mousilini" kujiray baananka ayaa looturay waxaana kursigii Talyaaniga soo fadhiistay Mareekan. Wixii ka danbeeyey dagaalkii 2aad ee dunida Mareekanka ayaa noqday guwada koobad "Pax Mareccan" talada dunida wax laga waydiiyo wuxuuna kala wareegay Ingiriis Pax Britannica" dardar cusub ayuu mareekan kulasoo dhexdhacay geedisocodkii reer yurub ee kasoo unkaday Berlin 1884 "QAATAYE QAATO", Mareekanku wuxuu noqday quwada kaliya ee isticmaashay bambada nukliyeerka dagaalkii labaad ee dunida; midhaas ayaa

argagax iyo cabsi ku abuurtay dunida inteedikale oo u sandulaysay wadankasta inuu awaamirta Mareekanka u hogaamsamo. Mareekanka ayaa noqon awooda kaliya ee dunida kajirta si' markaa loo ilaaliyo dheelitirnimada caalamka ayaa shuuciyadii Ruushka hoosta looga dhiibay foormulada laga sameeyey nukliyeerka.

Guud ahaan Soomalida "Italian Somaliland", labo awoodood ayaa jooga oo odhaahda ugu danbaysa ka dhiibtay masiirka soomalida iyo geedisocodka siyaasada geeska afrika labada dal waa labada ee dunida ku haysta dimoqradiyada iyo lacagta waa Ingiriis iyo Mareekanka. Ingiriiska siyaasadiisu waa mid qabo "passive" oo hoosta ayuu kaga nabanyahay dhaqdhaaqkasta oo caalamka kasocda halka Mareekanku siyaasadisu tahay mid muuqada "active" oo dhusha sare ka maamusha masiirka soomalida. Wadamada geeska afrika dhaxal waxaa u helay mareekan iyo ingriiska iyaga ayaana wax laga weydiiya mustaqbalka wadamadaa. Arinkasuna sidaas ayuu ahaanaya ilaa iyo inta qaramada midoobay fadhiisinkoodu yahay Mareekanka oo uu Washington martiqaadayso dunida, ma suurtoobayso in siyaasada uu Mareekan ee geeska afrika ka damacsanyahay la liiciyo.

Ingiriis si'aanu gebi ahaanba saaxada siyaasada geeska uga bixin wuxuu mareekanka ku qancinayey in heshiiskii hore ee Berlin walijiro oo dalalka geeska afrika saami ugu helay in Ingriisku maamulo oo mareekan ku qabsankarin waana sababta kaliya ee uu Ingiriis wali ugasii lusho wadama geeska heshiis afgarasho ah

ayey kuwada joogan. Kenya waa maxmiyada Ingiriiska xeebta dheer Kenya waxay ugu talogaleen inay ka khaawisaan badda paific ocean iyo beriga dhexe ee afrikada.

Waxynu ogsoonahay in dagaalki labaad “WW2” ee dunida ka dhacay iyo garabkii guuleystay aan lagusoo koobi karin mareekan iyo ingiriis lakinse xulufo wadasocotay ay wadajabiyeen cidamadii Jarmalka. Wadama guusha dhinacooda ka sheegta waxaa kamid ah fransiiska iyo ruuska. Inkastoo aanu Fransisku qayb libaax ka qaadan dagaalka dhacay 1949-45 iyo xoreyn Yurub oo ah xisaabta isku ay riixan isticmaarku marka arinku soogadho sadbuursanimada misna saami weyn ayuu ka qaatay afrika Fransiisku waxaan loodayey inuu galbeedka afrika haysto. Bariga afrika wuxuu kadagay oo cidhiidhsaday Djabuuti oo noqotay meel bala buuq ah. Ruushku wuxuu ku mashquulsanaa fadhiisinta iyo hirgalinta falsafadii shuuciyada halka wadamada reer galbeedku dhankooda baalasha kalabixinayey oo ay qaybsanayey dunida inteedakale.

Wakhti danbe oo dunidii laqabsaday ayuu soo baraarugay Ruushku wuxuuna bilaabay inuu afkaar (idelogiyad) ku salaysan hantiwadaag oo lidku ah ta ideolojiyada isticmaarka inuu ku banaysto, wayna shaqaysay oo aqoonyahano ku tababaran afkaarta hantiwadaaga ayuu kusoo dhextuuray dalalkii isticmaarku haystay. Wuxuu shidaal ugasii dhigay inuu hubeeyo dhaqdhaqaaqa lagu dagaalamayo isticmaarka, wadankastoo iska kiciya wuxuu ugu abaal gudayey inuu wadankiisa tababaro iyo farsamo ugu qaado.

Isutagii sufyeedka, 1940kii ayuu geeska afrika xoogiisu yimi waxaan afkarta shuuciyada markiba ladhacay Soomalida iyo qaybo kamid ah Ethiopia, inkastoo ingiriis iyo mareekan dusha kalasocdeen oo xadhigkasta oo shuuciyadu xidhoba furayeen misna shuuciyadu way ka dhextoostay geeska afrika. Geeska afrika wuxuu noqday meel dawlado waa weyn iyo dawladihii martida loo ahaaba oo lakala safan isticmaarka iyo shuuciyada ku hirdamaan, waana takeentay inaan horumar taama aanay marnaba ka hirgalin dalalka geeska afrika, hadba qoloda dibada joogta ayaa afganbi “regime change” iyo jabhado ku minjo xaabinayey qolyaha kale ee talada haya oo markaa iyagu madaxa lakacay talaabooyin horumarineed sameeyey. Horumarku wuxuu yimaada marka talada dhinac loodayo oo aan laga shaashayn si wakhti loogu helo hindisaha markaa jooga.

Qoraalka intiisa hore wuxuu bundhig u yahay sooyaal geeska afrika wuxuuna inaga caawinaysa inaynu fahamno siyaasadaha kaladuwan ee iskuhaya wadamada geeska iyo qaabka lookala raacay. Waxaa kasii muhiimsan oo sooyalka tarikhda geeska iyo cida iskuhaysa inoo sahlay inaynu saadal dhamastiran iyo biyo-dhiga siyasadeed ee geeska ku danbayndoono.

Geo-politcalka kajira geeska afrika iyo wadamada ku hirdamaya ayaa u muuqda inay ka gudbeen marxaladii koobad waxayna isu diyaarinayaan marxalad labaad midhaas oo ah jawi horumarineed iyo dhaqaaale sidii laysugu maquunin lahaa. Durtubo marxaladaa labaad way muuqata waxaanad arkay

isasootarista mashaarici waa weyn ee dhaqaalaha xambaarsan oo kusoo badanaya wadamada geeska. China oo matalay shuuciyada ahna calansidaha hantiwadaaga cusub ayaa mashaaric balaadhan ka bilowday Ethiopia, wadooyin, shidaal qodis, dhismayaal iwm. Dhinaca 'II QABO AAN QAATE' ayaa wada mashaaric kale oo hindisaha ka danbeeya yahay in lakasbado quluubta shacabka, Beribera Corridor, Sanyare Berbera to Dollow, Engineer Yarisow Project, DP World, sahaminta shidaal, dimoqradiyada. Mashaaricda lagu horumarinayo wadamada geeska noocaydoonaan ha noqdaan waxay ka turjumayaan marxalada labada ee laysku reebayo cida katalindoonta Gesska Afrika.

Lakinse intaynaa halkaa hore ugasii socon bal aynu soo qaadano qolyaha siyaasada dunida dilaala iyo saamaynta ay kuyeeshan go'aamada dunida ka dhaca. Siyaasada dunida waxaa hagta lacag, inbadan, "markaasta" siyaasada caalamka ka aloolsan iyo dhaqaalahu way wadasocdaan. Markaynu sidaa lee nahay waxaynu ujeedna "faro'aan dufan lahayni waxba maduugan' qolyahay lacagta iska leh, waa bangiyada iyo shirkadaha lacagta samaysa.

Tariikhda raad raaca lacagta waxay inala gelay koox gaara oo ah marka laga yimaado hogaamada dalalka matala noqonaya kooxda labaad ee dunida ugu saamaynta badan ee la dhagaysto. Kooxdasu waa mulkiilayaasha lacagta (e.x Rothschild family) oo ka kooban dhawr qoys oo shuraako ah, waa shirkadaha shidaalka qoda (seven sisters), International Monetary Fund

“IMF”, Wold Bank “WB”, Banks of International Settlements “BIS” iyo jaranjarada ugu hoosaysa oo ah bangiyada dhexe ee dawlada u adeega. Kooxda aynu sheegnay waxay gacanta ku hayaan dhaqaalaha dunida guud ahaanba shilin aanay ka warhayni systemka lacagaha dunida laga aqoonsanyahay masoogalo. Waxay ka warhayaan khayraadka dunida meeshu doono hakujiree waxay gacanta ku hayaan dalalka waa weyn ee saamaynta siyaasaded leh. Waa koox markay macaash raadis ah yihiin dunida roga, waxay qayb ka yihiin qalabaa-gadiska dunida iyo indho sacraadka lagu abuuro hanti aan horujirin “lacag” waxay maal galiyaan daagalada dunida ka dhaca.

Dagaalada loo nisbeeyo inay sababtooda lahaayen inay dhacaan waxaa kamid ah dagaalkii Waterloo, dagaalkii koobad iyo kii labaadba, Ciraak iyo Afganistan. Dagaalada dunida ka dhaca cidna way ku khasaarta oo dalal baa lagu waaya cidkalena way ka faa’ida oo u hadha. Waddan jira ayaa khalkhal siyaasiya lagalinaya si’uu u burburo waxaa lala wareegaya wixii soo hadha markaasa hantidiisa misna dibu looudhisaya inta lacag la amaahiyo, markasta waa u macaash. Waa qolyo aminsan in 100kii sano mar la baandheeyo siyaasada dunida kajirta si’aan farsamooyinkooda loola qabsan.

Qorshayasha laga leyahay Geeska Afrika ee waji labaad galay waxaa hagaya kooxdan macaashdoonka ah oo siyaasiyiinta geeska saamaynta kuleh gacanta ku haya. 70kii, ayaa wadamada carabta lagusoo galay mashaaric iyo shidaal qodis. Wadamada reer galbeedku waxay aminsanyihiin in marka ugu horeysa in

lays daad raaciyo (siyaasada ingiriiska) oo siyaasad qabo lagu soo dhuunto danahooda ay leeyihiin waxayna ilcaamiyaan mashaaric horumarineed iyo in lala dagaalamo saboolnimada ayaa foodsaro u ah waxayna awooda saaran xukunka inaanay kala fogaan. Saaxibo dhaw ayaa laga dhexsamaysta dalalka markaa diiradu saraantahay, hadii tooda noqonweydo waxay keensadaan cidkale oo afkaarta socodsiisa.

Waxay ka hawlgalaan haldoorka bulshada saamayn kuleh wadaad, suldaan, siyaasi iyo ganacsato waxaana lagu maamusa dhaqaale iyo xilal, hadii ay ka maarmi waydo waxaa loogu daraa caafimad dibada ah.

Intooda badan hogaamiyaasha salaanka kusoo fuulay “QAADO AAN KAA QATEE” waxay lakulmaan waji gabax waxayna ogaadan inay siyaasad qorshaysan oo dhinac kaliya usocota qaybka ahaayen. Waxaynu taarikhda ku haynaa wadamadii dimoqradiyada laga hirgaliyey ee misna isla dimoqradiyadu ciqaabtay inay dareenka qabeen. Iran waxay kamid ahayd wadamada dimoqraadiyada qaatay ee horumarka ku talaabsaday, wakhtiga horumarka Iraan waxaa labarbar dhigaa inuu lamid yahay horumarka wadamada reer galbeedka. Shidaalka laga helay Iraan iyo qaabka wanaagsan ee loo maamulay loona ilaaliyey dakhliga ayaa sabab u ahaa isbadalka Iraan. Lakinse, Shirkadihii markaa gacanta ku hayey shidaalka Iraan ee ‘dimoqraadiga’ ayaa dareemay inaan dad soo jeeda hantidooda aan si’fudud gacmaha laga buuxsan karin waxay kadoor bideen inay dimoqradiyadii Iraan ku badhaadhay

afganbiyaan oo talada udhiiban boqorkkii caanaha ku maydhanjiray “Shaah”.

Sadaam Xusein ka hor intaanu noqon horror cidkasta cagta mariya wuxuu ahaa dimuqraadi lawato oo shuruudaha lagu xidhay oo dhan buuxiya waana tii loo dhiibay Ciraaq. Sidii uu uyidhi ina xisaabiya inbadan baan shacabka idinka hayey oo aad qaadanayseen ayuu noqday mid kutunta shareecada biniadamka, digteytar kurdida iwm waa tii hadhcad iyo maalin ciida la daldalay. Sii la mid jaranjarada lajiifiyaana banaaan ayaa Qaafi iyo Robert Mugaabe lagusoo waday lakinse danbe ayey noqdeen coomadeyaal dimoqraadiyada ka horymi.

Siyaasada ku wajahan khayraad dunida waa inloo hela dariiq lagu laba gacmoodiyo waa inay jiraan shikhsiyaad ama koox bulshada indhaha qaba inta laga xaalufinayo khayraadka dalka. Geeska afrika waxaa kujira khayraad badan oo dunida jihaynkara 100 sano ee socoda. Khayraadka ugu badaani wuxuu kujira dhulka Soomalidu degto. Khayraadku waa laba nooc mid qeedhin (dhagax) iyo mid bisil (dareere) dhaqaalaha xoogisu wuxuu kujira midka dareeraha ah. Khayraadka dareeraha ahi wuxuu ukala baxa saliid madow iyo gaas dabiiciga ah. Bad iyo beri waxaa lagu qiyaasa 100 billion oo foosto hadiiba aanu kabadnayn (wadanka 4aad dunida). 1800tiyadii ayaa sahankii ugu horeeyey ee shidaal ragu raadinayo laga sameeyey geeska afrika waxaana laxaqiijiyey in mid bisil iyo mid qeedhinba ay ceegagan dhulka sahanka laga sameeyey. 1900gii ilaa 1957kii, waxaa lafuliyey oo kuxigay wareegi labaad ee lagu ogaanayo

jiyoolojiga dhulka khayraadku fadhiyo waxaana la hubsaday baaxada dhulka uu kujiro iyo siduu ugu kalabadan yahay wadamada geeska afrika. Waxaa kuxigtay oo ladajiyey siyaasada lagu wajihidoono khayraadka Geeska laga helay iyo qaabka ugu macquulsan ee loo sosaarikaro. Waxay go'aamiyeen inaan wakhtigan lasoo saarin shidaalka geeska afrika ilaa iyo inta laga dhamaynayo shidaalka kujira wadamada carabta. Waxaynu ka warhaynaa maanta in wadamada carabta shidaalkoodu inuu gaabsi kusiijiro wakhtigii shidaalka Geeska Afrika kujirayna gaadhay waktigi lasoo saarilaha. Ceelasha kuyaalay dhulka Soomalida degto ayaa noqday kuwada ugu saliida badan waxaana la gaadhay wakhtigii looqabtay in daboolka lagaqaado. Waana arinka ugu muhiimsan ee hagaya siyaasada ka aloolsan wadamada Geeska Afrika.

Ethiopia oo aynu soo sheeganay inay halbawle u tahay wadamada Geeska ayaa nasiib u heshay inay noqoto wadanka ugu horeeya ee heshiis ku gaadha inloo soo saro shidaalka kujira degaanka Soomalida. Arinkaa shidaalka laga qodoyo Layslama sugine, dawladihii danaynayey iyo ururadii banaanka kajoogay talada dalka Ethiopia ayaa ka horymi shidaal qodista waxaana xigtay inuu bilaabmo dagaalki 77.

Wadamada midigta ayaa wakhtigaa hoosta kaga jiray Mingiste lakinse waa lagaga itaal roonaaday inaan shidaal laga qodin kilika 5aad. Mareekan, markii Ethiopia dhinaca bidixda raacday iyagoo dareensan in Soomalida dagaalka lagu dhiirigeliyey oo

dhabarka lasoo taabtay ayuu isna utalaabay dhinac Soomaliya oo markaa isku dhacsan shuuciga.

Markiiba heshiisyo cusub oo shidaalka khuseeya ayaa lagalay Soomaliya. Isla dabayaaqadi 70kii shirkado kasocda wadamada reer galbeedka ayaa kasoo degay Moqdisho oo sahan iyo qodis shidaalba ka bilaabay bad iyo beriba. Heshiiska dhexmaray Maxamed Siyaad Barre iyo shirkadaha mareekanka ayaa ah arinta ugu muhiimsan ee Farmaajo xukunka ujoogo.

Ingiriis, waxaad mooda inaanu heshiiska shidaalka Soomaliya iyo Mareekanku wadagaadhen aanu kujirin oo aanu waxba kulahayn, waxaan la odhankara in maqnaanta uu Ingiriis ka maqanyahay heshiiska shidaalka keenay in siyaasada Soomalidu iskadaba wareeg kujirto oo anay dhinac udhicin oo Mareekan iyo Ingiriisku ku kala qaybsanaado roadmapka soomlida loo jeexay. Iyadoo sidaastay warhaynaa ka warhaynaa in heshiiskii shidaalka laga saaray kor u haynta “Force Majeure” oo sahan shidaal kasocdo meelo badan dhulka Soomalidu degto oo kolokastaba dhankeeda ka horarsanayso.

Marna reer galbeed way kala socdaan oo khayraadka sidii looqaybsan lahaa ayaa laysku haya oo Mareekanku inuu Ingiriiska wax kasiiyo ma ogola Turkiga ayuu labada doorbidayaa. Ingiriis’na wuxuu tab iyo xeelada isugu geeyey inuu Somaliland aanu siidayn oo ku gorgortamo. Habsocdka siyaasadeed ee kajira Moqdisho iyo Hargeisa waa isku mid oo labada waa looyedhiyaa, waxay kakala duulan labada aragtiyood ee Mareekanka iyo Ingiriiska kalawataan. Soomaliya inay

midowdo Mareekan iyo Ingiriis way kuwadasocdaan oo inlamidoobo waa ka raali lakinse waxay isku hayaan oo anay kuwada socon qaabka dheefta shidaalka loo qaybsanaayo. Waxay kala aminsanyihiin oo in federal system iyo co-federal system inlakala ahaado. Mareekan wuxuu xal u arkaa oo leyahay in maamul wadag iyo awood qaybsi “federal system” la sameeyo isgoo markaa ilaalinaya heshiiski uu ka siigadhsiyey Maxamed Siyaad Barre ee kootada shidaalka Soomalida loogu xidhay shirkadaha shidaalka Mareekanka. Halka Ingiriis dabada hayo oo aminsanyahay isagoo saamiqaybsiga shidaalka maanka ku haya xalka Soomali ku dagikarto u arka nadaam in loo sameeyo “co-federal system”, Co-federal systemka ayaa farsad siinaya in shidaalka Soomaliya qaybtiisa qaato..

11.

12 Kaas biloodba waxeey Ay U sameysteen Magacyo Gaar Ah Waxa ay Kale yihiiin.

Bilaha 12 ka Ee Soomalidii Hore ay Adeegsan Jireyn Waxaa Ka mid Ah .

I:laxadhaqe 30

ii:Diraacgood 30

iii:Samalaho 30

iv:kalahan 30

V:Dambarsame 30.

Maalinta Waxay u kala qaybsantaa dharaar iyo habeen. Dharaartu waa inta iftiinka qorraxeedi jiro, waxayna kala tahay: Waaberi (0600), Barqo (1000), Har (1200) iyo Galab (1500). Habeenku waa inta iftiinka qorraxeedi maqan yahay, waxaana qaybihihiisa ka mid ah: Fiid (1800), Caweys (2100), Saqdhaxe (0000) iyo Jiidh (0400). Socdaalista goor waaberi ah waxaa la dhahaa “jarmaado”; har → boqoole; galab → carraabo; fiid → hoyasho;caweys → dheelmasho; saqdhaxe → guure; iyo jiidh → kallahaad. Haddii aad socdaalaysid galab (casar ah), waad carraabaysaa.

Maalmaha Soomalidii Hore ay Isticmaali Jireyn.

Koowin (Axad), Lammin, Lamtoka, Koodaar, Hakisa, Hakisbila, iyo Sooroga (Sabti).

Waxaaas Oo Xog Waxaan Ka heley Ninkii Igu soo dhaweeyey Magalaada Acre

Intii Aynu sii Soconay ayaan Ka heley Waxaas oo Xog Ah ,Waxaan Is iri Ninkaan Somalida aqoon Badan aaadan u Laheyn adoo soomali ah Buu hayaayeh Kulank Kale Waa Ineynu Is Aragnaaah Wuxuu Igu jawaabay Soo Bax Aad lasoo kulantid Xaaskeyga somalida ah ,Waan Farxay sababToo Ah Waxaan chance Ku Heley Mar kale Iyo Kulan Kale Waxuu igu Yiri Halkaaas Buu Yaalaaah Gaarigyga Annoon Kor iyo Hoos Fiirin baan Gaariga dhiniciisa U dhaqaaqnay Markii aan saas U Fuulay Ayaan suaaalo Ku Bilaabay .

Nb:Hadda waxaan U qori sidii wada sheekeysigii Isla Socod Wanaagsan.

Intaaan Jidka Kusiii Jirnay Waxaan ka Wareysaneyy Is Barasho Wuxuu ii Sheegay Magaciiisa Oo ahaa Ezekiel.

Markaaan Cabaar Sii soconay Wuxuu Wacay Xaaskiiisa Wuxuuuna ku Yiri Waxaan imaaan Xafada waxaan ila socoda Labo 3 Marti ii ah Aad Qaali Igu Ah Ee Soo Dhaweyntu waa Xagaaga Waxeey Ugu jawaabtay כן דרלין Oo ah Hayeh MaCaaan .

Angelina a Mason: Ezekiel Aniga Kaligey Kuma Racaayo Miyaah.

Ezekiel:May Waxaa Jidka Naga Racaya Saxiibkeey Caleb Wuxuu ku Dhashay Jerusalem Wuxuuna ku Barbaaray Qoys Cilmaani ah Wuxuuna Si Fiican iga Caawiyey Sida somlida Looga dhigi Lahaa Calmaani ,Mulxid ,Iyo Yuhuud Qorshahaaas Si Fiican buu Igu Hirgalay ,wuxuuna Tagay meelo badan sida somalia , Wuxuu ka mid Noqday xooga dalka Esrail Wuxuuna halkaaas kala kulmay xaaskiisa Shoshana Weey is Guursadeen Halkaas Waxeey Ku bilaabeyn Safarkoodii Si ay Ciyaalkooda Ugu Dhaqi Lahaaayeen dhaqanka yuhuuuda ,Waxeey Isku dhaleyn 5 Caruuur .

Kan Kalena waa Nin Muslim ah Magaciiisuna waa Mohammed masad wuxuu kasoo Jeedaa Burkin Meel U dhow Jenin ,Waad Is Baran Doontaaan .

Intaaas Markuu yiri Buu Gaariga Istaajiy Mise Waxaaba Guri U dhow Kasoo Baxay Odoy aan Ku qiyaasay 70 sanno Jir Lakiin xoog Leh Wuxuuna Isoo Garab fariistay Waxana U maleynayey

Odoy Shiikh Ah Oo aan Dumarka Fiirin Waxaan qaban Suraaal Gaabay Oo Bowdyadeyda Oo Dhan Qaawan Tahay Markiiba Gacanta Intuu Bowdyaheyga Saaray Oo Saas Gacanta U dhaqaajiyey Markuu Marayey meel U dhow Xubinta Taranka jirkeyga ayuu GacanTiisa Joojiyey Igu Yiri Shabbat Shalom Waa السلام عليكم oo kale Salaantii Baan dib Ugu Celiyey wuu Iga aamusay ,Wax yar Ilaa 0.1km Aan dhameyn Markaan soconay Baa Kiii Muslim Ka ahaa Baa soo Galay Gaaariga wuu na salaamay Ilaa Xafada waa la Aamusanaa Ugu dambeyn Xafadii Buu Na Geeeyey Jacket Weyn aan qabay buu Iga qaaday meel Suray kabihiina Iridka Hore Baan iska bixiyey Xaaskiisa Baa Na salaantay ka Dib waxeynu Ku Fariisanay Kursi Coffee Lugu Cabo Waxey Na Noo Keenatay Biyo shaax Oo kale ah ,Meeshii ayaan Cabaaar Ku Sheekeeysanay Waxaa Odeygii suaal I weeydiiiyey Wuxuu Yiri .

Maalmihii Ugu dambeeyey Ka dib 40 sano Ee saxaraha Maxaa ku Dhacay Muuse .

Saan Iri muusahee.

Suu yiri : intuu Qoslay Adinku Waxaad U Taqaanaaan Nabi Muuse.

Saan iri :Ma,aqaaan .

Suu Yiri :I dhageyso wayahee Muuse Wuuu Dhintay Sidoo Kalane Wuu Niyad jabay ,Tobankii belaayo ka dib, Muuse wuxuu reer binu Israa'iil ka soo saaray Masar iyo Badda Cas, ka dib markii ay saldhigteen Buur Siinay, halkaas oo Muuse ku helay tobanka amar (Ten commandments). Ka dib 40 sano oo uu cidlada ku wareegayay, Muuse wuxuu ku dhintay Buur la Yiraahdo Nebo isagoo 120 jir ah, isagoo arkaya Dhulkii Ballanqaadka.

Saan Iri : Maxaad Ka wadaa dhulkii ballanqaadka.

Suuu Yiri :Dhulkii Balanqaadka Qof walba Wuu sheegtay Obama madaxwenihii America Wuxuu Ku Tilmamay Dhulkii Balanqaadka In Uu Yahay America Gaar Ahaan California, Yuhuuduna Waxeey dhahaaan Waa Marka loo Eego Tenkh Oo ah (the Hebrew Bible or Old Testament) waa dhulkii La siiyey Ibraahim Iyo Farcankiiisiiiii ,Balse Xaqiiiqdu Saas Maaaha ,Qofka Taariikh Yahanka ah Wax Walba oo wanaagsan Wuxuu U Leexsadaa Dadkiiisa ,Hadda weeynu wada Ogsoonahay In Sayid Mohammed Cabdulle Xasan Uu ka Guuleystay Gaaladii Kusoo Duushay Dalka Lakiin Markaad Akhrisid Buugii Uu ka qorey ninkii La Oron Jirey Ray beachey Buuga magaciiisa The mad Mullah Of Horn Africa, Wuxuu Ku Tilmaamay In Guuulo Badan

uu sheegtay Xaqirana Guulihii Faraha Badnaaa Ee Ay soo Hoyayiiin Ragii Daraaawishta Ahaa Waxaaan Ka mid ahaaa Guulihiii December 21, 1920-kii waa maalintii uu geeriyooday geesigii Soomaaliya Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, dhulka looga yaqaano Somaliland, Nugaal iyo Taleex.

Sayidka oo caddaanka ugu yeeraan”Mad Mullah oo ah wadaadkii waalnaa”waa sheeko kale oo Soomaaliyeed oo Taariikh dalkeena ku faano, baal dahab ahna ka galay.

Sayidku wuxuu dhashay sanadkii 1856 gugii la magac baxay “Gobeysane” oo ahaa gu barwaaqo ah dad iyo duunyaba wixii dhashay hanaqaad noqdeen wuxuu ku dhashay balliga la yiraahdo Sacmadeeqo oo Buuhoodle ka tirsan.

Quraanka wuxuu ku bartay gurigoodi,cilmigana wuxuu ka raacday xer fadhiyi jirtay Nugaal Abbaarahii 1892ki wuxuu u kacay Makka iyo Madina waxeeyna isu raaceen 13 wadaad oo ay isku xer ahaayeen.

Sayidka magaalada Maka waxaa ay isku arkeen wadaad Suudaani ah oo Saalix lagu magacaabi jiray, Sayidka waxaa uu ahaa Saalixiya oo ah dhariiqo ka tirsan Suufiyada.

Xaaji Maxamed 1895 ayuu dalka dib ugu soo laabtay, markii uu dalka soo cago dhigtay, Berbera ayuu Ingiriis Cashuur ugu diiday, isagoo kor u qeyliyay kuna afceliyay ninkii Caddaanka ahaa, wuxuuna ugu jawaabay: “Adiga yaa cashuurtii kaa qaaday markaad halakan ka soo degtay?”.

Dabadeedna afceliyihii baa ku yiri ingiriiskii “waa wadaad waalane inaka daa”. Sidaa daraadeed waxaa ingiriisku ku magcaabay wadaadkii waalaa.

Daraawiish labaatan sano ayey duurka ku jirtay, mar la jabiyo iyo marar ay guulaystaan, Xabashi, Ingiriis iyo Talyaani intaba foodda ayey is-dareen, heshiisyo badan ayey galeen, dhamaan guuldaro ayey ku dhamaadeen.

Sayidka Gabayadiisa waxaa ka mid ahaa: Sagaal nin oo walalo ah sideenaas, sideeduna bah gaar tahay sidiinaas, ninkuna bah-gaaryahay sidaydaas, sideeduba ninkii siri sidiinaas, nikuna sirtii og sidaysaad, hadaynu isa-siri sideenaba ma iska kala tagnaa sideedaba”!.

1900-1920-kii, 41 goobood ayay ciidamada Daraawiishta Ingiriisu ku kulmeen, kuwi ugu waaweeynaa ama dagaalka xumi ka dhacay waxaa kamid ahaa: Afbakeeyle, Faradhiddin, Cagaarweeyne, Daratoole, Jidbaale iyo Dulmadoobe(August 1913kii)

Duullaankii koobaad iyo kii labaad oo bilowday 1899 waxa ay dhamaadeen October 6, 1902 dii. Goobihii Ingiriiska iyo Sayidku ku kulmeena waxaa ugu weynaa Af-Bakayle iyo Fardhidin.

Ingiriiska intii ay socdeen labadii duulimaad ee horre waxaa u korodhay waayo-aragnimo dheeraad ah waxayna ogaadeen xoogga Daraawiishta oo ah mid aan dhayal loo loodin karin.

July 3, 1903 dii waxaa dhamaaday dagaalkii saddexaad oo intuu socday Sayidka iyo Ingiriisku Bari iyo Waqooyiba ku dagaalameen.

Dagaalkii afraad wuxuu ahaa mid ay xoog uga qeyb galeen maraakiibta dagaalku, waxaana Ingiriisku go'aan ku gaadhay in Sayidka siddii dowlad xoog badan oo kale loola isticmaalo. Goobihii laysaga horyimid intii duulimaadyadaasi socdeen oo Daraawiishta iyo Ingiriisku isku haleeleena waxaa ka mid ahaa Beerdiga, Cagaarweyne,

Daratoole, Taargooye, iyo Jidbaale.

Dawlada Ingiriisku waxay isku dayday inay Sayidka kula isticmaasho siyaasad la mid ah tii boqoradii Hindida ay kula dhaqantay oo ah inay maal badan iyo mushaaro joogta ah siiso.

Dagaallada caanka ah ee dhacay waxaa ka mid ahaa dagaalkii lagu dilay taliyihii ciidamada Ingiriiska Richard Corfield, gaalkaasi oo Soomalidu u taqaanay Koofil ahaana ninkii Sayidku ka tiriyey gabaygii caanka ahaa, ee Adaa Koofiloow Jiitayoon.

Adaa Koofiloow jiitayoon dunida joogayne

Adigaa jidkii lagugu wadi jimic la'aaneede

Jahanaba la geeyoow haddaad aakhiro u jahato

Nimankii janno u kacay war bay jirin inshaalleye

Jameecooyinkii iyo haddaad jowhartii aragto

Kuwase naarta joogiyo markaad jananadii gaadhid

Sida Eebbahay kuu jirabay mari jawaabteeda

Ciidamada Ingiriiska ee barrigu waxba waa ka tari waayeen Sayidka waana usoo dhawaan waayeen Taleex iyo qalcadihii kale. Sayidku wuxuu ku caan baxay tabco iyo taaktiko dagaal.

Ugu dambayntii waxaa Sayidka lagu soo kacshay dayuuraadka dagaalka waxaana weeraradaa hogaaminayey Dhame Duuliye Gordon wuxuuna cadowgu isticmaalayey diyaaradaha noocoodu ahaa DH9, waxayna duqeeyeen Taleex, Jiidali iyo xarumihii Sayidka oo dhan. Sidaa darteed, Daraawiishtu waxay ahaayeen urur gobonimo doon ah ee adduunyada ugu horeeyey ee dayuuradaad lagula dagaalamo. Sayid Maxamed intaa kadib wuxuu soo aaday Koonfur.

DHAMAAAAD

Waad ku mahadsan tahay soo gaaaritaanka halkaan